

Codsiga loogu talagalay adeegyada Kaliya Qorsheynta Qoyska ee loogu talagalay dadka aan muwaadiniinta ahayn

<p>Miyaad xaq-u-leedahay adeegyada Barnaamijka FPO ee loogu talagalay dadka aan muwaadiniinta ahayn (dowladdu-maalgeliso)</p>	<p>Barnaamijka adeegyada FPO ee loogu talagalay dadka aan muwaadiniinta ahayn (dowladdu-maalgeliso) ayaa waxaa loogu talagalay shakhsiyaadka aan ka soo bixin shuruudaha jinsiyadda ama xaaladda socdaalka, ama shakhsiyaadka u-qalma ee aan ka soo bixin mamnuuca socdaalka ee 5-ta sano. Barnaamijyada FPO ayaa waxaa heli kara dadka deggan Washington ee leh dakhli dhan ama ka yar 260% ee heerka saboolnimada federaalka (FPL), iyada oo aan la eegayn xaaladda socdaalka iyo jinsiga, ee aan xaqa u lahayn barnaamijyada Apple Health ee baaxadda buuxa oo haddana haysan caymis caafimaad kale.</p> <p>Barnaamijyada FPO ayaa sidoo kale waxaa heli kara shakhsiyaadka caysan ee raadinaya adeegyada qorsheynta qoyska oo qarsoon ama sir ah. Waxaad waqti kasta codsan kartaa barnaamijyada FPO.</p>
<p>Miyaa lagu tixgeliyaa in aad Tahay qof deggan Washington?</p>	<p>Waxaad tahay qof deggan gobolka Washington haddii aad hadda ku nooshahay ama oodna ku talo jirtid in aad sii degganaato Washington, soo gashey gobolka adiga oo shaqo raadinaya ama soo gashey gobolka adiga oo haysta ballanqaad shaqo</p>
<p>Waa maxay dheefaha la caymiyay?</p>	<p>Dheefaha waxaa ka mid ah, balse aan ku xaddidnayn:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Booqashada dhammeystiran ee ka hortagga qorsheynta qoyska • La-talinta, waxbarashada, bilaabidda iyo maareynta xakameynta dhalmada (oo sidoo kale loo yaqaanno ka hortagga uurka) • Baaritaanka kansarka ee marinka hoose ee minka • Qaar ka mid ah daaweynta iyo baaritaanka cudurrada galmada la isugu gudbiyo (STD) iyo caabuqa galmada la isugu gudbiyo • Daawooyinka la isu qoro iyo kuwa aan la isu qorin ee ka hortagga uurka (xakameynta dhalmada) • Habraacyada ma dhalays ka dhigidda
<p>Sideed u codsataa?</p>	<p>Waxaad waqti kasta ka codsan kartaa barnaamijyada FPO, adeeg bixiye aqbal Apple Health ama adiga kaligaaga adiga oo wacaya 1-800-562-3022 ama u gudbinaya codsigan adiga oo u marsiinaya:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Boostada: HCA MEDS, PO Box 45531, Olympia WA 98504-5531 • Fakis: 1-866-841-2267 • limayl: apple@hca.wa.gov
<p>Waa maxay ikhtiyaarada kale ee caymiska caafimaadka ee laga heli karo gobolka Washington?</p>	<p>Eeg barnaamijyada Apple Health ee la heli karo oo ay ku jiraan muhaajiriinta aan sharciga haysan iyo kuwa aan u qalmin:</p> <ul style="list-style-type: none"> • hca.wa.gov/apple-health-non-citizens • hca.wa.gov/apple-health-pregnant-individuals
<p>Sidee ayaad u buuxinaysaa qaybta 1aad?</p>	<p>Buuxi dhammaan inta aad awooddo. Hoos ka eeg macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan su'aalaha gaarka ah ee ku xusan qaybta 1aad ee codsiga.</p>

<p>Sidee ayuu Maamulka Daryeelka Caafimaadka (HCA) u adeegsadaa lambarkaaga Dammaanada Bulshada (SSN)?</p>	<p>HCA ayaa macluumaadkan adeegsata si ay u go'aamiso xaq-u-yeelashadaada iyada oo xaqiijinaysa aqoonsigaaga, jinsiyadaada, xaaladaada socdaalka, taariikhda dhalashada, iyo helitaanka caymiska kale ee daryeelka caafimaadka. HCA lama wadaago macluumaadkan hay'ad socdaal kasta ee loogu talagalay ujeedooyinka fulinta socdaalka.</p> <p>Codsashada adeegyada FPO ee loogu talagalay barnaamijka dadka aan muwaadiniinta ahayn (dowladdu-maalgeliso) ma saameyn doonto xaaladdaada socdaalka ama fursadaha kale ee aad ku noqon karto deggane ama muwaadin. Haddii aadan haysan SSN, iska dhaaf waxyaabaha iyaga oo bannaan.</p>
<p>Sidee ayuu HCA u adeegsadaa macluumaadka xaaladdaada socdaalka?</p>	<p>HCA ayaa adeegsada macluumaadkan si uu u go'aamiyo xaq-u-yeelashadaada isaga oo xaqiijinaya aqoonsigaaga, jinsiyadaada, xaaladdaada socdaalka, taariikhda dhalashada, iyo helitaanka caymis caafimaad kale.</p> <p>HCA lama wadaago macluumaadkaaga hay'ad socdaal kasta ee loogu talagalay ujeedooyinka fulinta socdaalka.</p> <p>Xaq-u-yeelashada adeegyada FPO ee loogu talagalay barnaamijka dadka aan muwaadiniinta ahayn (dowladdu-maalgeliso) ayaa waxaa ka reebban imtixaanka mas'uuliyadda guud ama dowladda. Haddii aad qabto su'aalo ama welwello ku saabsan sida codsiga Apple Health ama adeegyada FPO ee loogu talagalay barnaamijka dadka aan muwaadiniinta ahayn (dowladdu-maalgeliso) ay u saameyn karaan xaaladaada socdaalka ama fursadaha aad ku noqon karto deggane ama muwaadin, la xiriir qareen socdaal.</p>
<p>Ma jiraan adeegyada luuqadda ama naafonimada oo la heli karo marka la codsanayo?</p>	<p>Si aad caawimaad bilaash ah ugu hesho luuqado kale (oo ay ku jiraan tarjumaan ama agabyo tarjuman oo daacaban) ama diyaafadinta naafonimada, wac 1-800-562-3022. Wax badan ka oggow: hca.wa.gov/interpreter-services.</p>
<p>Ma adeegsan kartaa Wakiil Idman (AREP) oo kuu codsanaya?</p>	<p>Haa. Wakiilkda Idman (AREP) waa qof kastoo weyn oo si fiican ula socda duruufaha reerka oo reerkana u idmay in uu wakiil ugu noqdo ujeedooyinka xaq-u-yeelashada reerka. Tani waxaa ay ka duwan tahay kaashiga Hage ama Dallaal.</p>
<p>Waa maxay shuruudaha dakhliga ee barnaamijka FPO?</p>	<p>Dakhligu waa in uu ka hooseeyaa ama noqdaa 260% ee Heerka Saboolnimada Federaalka. Booqo hca.wa.gov/family-planning si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.</p>
<p>Sidee loo xaddidaa inta uu reerku le'eg yahay?</p>	<p>Inta uu reerka le'eg yahay ayaa la go'aamiyaa iyada oo lagu saleynayo xaaladda xareynta canshuurta. Xubinka reerka ka tirsan waa lammaanaha ama ku-tiirsanaha uu codsadaha la xareeyo canshuurta ama u sheegto ku-tiirsane canshuur ahaan. Haddii aadan canshuuro xareysan, xubinka reerka ka tirsan waa xaaska ama qof kugu tiirsan oo ku nool iska guriga.</p>

<p>Ka waran haddii aad leedahay caymis kale oo aadna u baahan tahay adeegyo qarsoodi ama sir ah?</p>	<p>Waxaad xaq-u-yeellan kartaa adeegyada qorsheynta qoyska xitaa haddii aad caymis leedahay, haddii aad ka soo baxdo mid ka mid ah waxyaabahan ka reebban:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Aad raadinayso adeegyada qorsheynta qoyska oo qarsoodi ah waxaadna tahay 18 sano jir ama ka yar; ama • Aad taahy dhibbanaha tacaddiga qoyska oo uuna ku caymiyo caymiska caafimaadka qofka kugu xadgudbaya. <p>Ka wac HCA 1-800-562-3022 si aad isugu qorto adeegyada qarsoodiga ah</p>
<p>Ka waran haddii aad leedahay caymis kale?</p>	<p>Xaq uma lihid adeegyada FPO haddii aad leedahay caymis kale oo caymiya adeegyada qorsheynta qoyska haddii aad raadinayso adeegyada qorsheynta qoyska oo qarsoodi ah mooyaane.</p>
<p>Waa maxay Apple Health (Medicaid) baaxadda buuxda oo ma tahay in aan ka tanaasusho xaqa aad u leedahay in aad codsato?</p>	<p>Haddii aad xaq-u-leedahay Apple Health baaxadda buuxa, waxaad heli kartaa dheefaha sida cusbitaal bukaan-jiif iyo bukaan-socod, caafimaadka guriga, adeegyada dhakhtarka, daawooyinka la isu qoro, adeegyada caafimaadka ilkaha, iyo daaweynta jirka.</p> <p>Waxaan kugu dhiirrigelinaynaa in aad codsato caymiska Apple Health ee baaxadda buuxa si aad u hesho dheefaha caafimaadka ee ugu badan ee aad xaqa u leedahay. Haddii aad rabto macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Apple Health ee baaxadda-buuxa, booqo hca.wa.gov/apple-health.</p> <p>Waxaad ka tanaasuli kartaa xaqa aad u leedahay Apple Health baaxadda-buuxa haddii aad xaq u leedahay oo aad welina qaadato adeegyada FPO.</p>
<p>Sidee iyo goormee ayaad oggaanaysaa xaaladda codsigaaga?</p>	<p>Codsiyada ayaa hawshooda la socodsiiyaa iyada oo la raacayo sida loo kala hor helay 45 maalmood gudahooda. Haddii macluumaad dheeraad ah loo baahan yahay, waxaa lagaala soo xiriiri doonnaa telefoonka iyo/ama iimayl-ka. Marka laga baraandego, warqad diidmo ama oggolaansho ayaa loogu soo dirayaa boostada.</p> <p>Adeeg-bixiyeyaasha qaarkood waxay bixin karaan adeegyada inta aad sugeyso soo gudbinta iyo ka-baraandegidda codsigaaga.</p>
<p>Miyaad rafcaan ka qaadan kartaa go'aaminta xaq-u-yeelashada?</p>	<p>Haa, waxaad rafcaan ka qaadan kartaa 90 maalmood gudahooda haddii aadan oggolayn go'aanka uu gaarey maamulka HCA, Washington Healthplanfinder ama Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada (DSHS) ee saameeya xaq-u-yeelashadaada caymiska caafimaadka.</p> <p>Haddii aad rabto macluumaad ku saabsan hannaanka rafcaannada, booqo hca.wa.gov/about-hca/file-appeal-apple-health-medicaid.</p>
<p>Halkeed ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah?</p>	<p>Macluumaad dheeraad ah ayaa waxaa laga heli karaa hca.wa.gov/family-planning.</p>

Codsiga loogu talagalay adeegyada Kaliya Qorsheynta Qoyska ee loogu talagalay dadka aan muwaadiniinta ahayn

Hadda miyaad uur leedahay? Haa Maya haddii aad Haa ku jawaabtey, xaq uma lihid adeegyada qorsheynta qoyska, balse waxaad xaq u yeelan kartaa caymis caafimaad. Bartan internet-ka ka codso **wahealthplanfinder.org**

Marka aad buuxiso codsigan, waxaad ku qireysaa in aad codsaneyso adeegyada qorsheynta qoyska oo keliya.

1. Codsadaha iyo Macluumaadka Xiriirka

Magaca koowaad (isticmaal magacaaga sharciga ah oo dhammeystiran) _____ Xarafka Hore ee Magaca Dhexe _____ Magaca Dambe _____

Lab Dheddig _____ Ma Deggan Tahay Washington?
Taariikhda dhalashada _____ Lambarka Dammaanada Bulshada _____ Haa Maya
(haddii aad mid leedahay)

Cinwaanka meesha aad ku nooshahay _____ Lambarka Abaarmanka _____ Magaalada _____ Gobolka _____ Sumadda Degaanka _____

Cinwaanka meesha aad ku nooshahay _____ Lambarka Abaarmanka _____ Magaalada _____ Gobolka _____ Sumadda Degaanka _____

Lambarka guriga/telefoonka _____ Lambarka shaqada/farriimaha _____ Miyaan kaala soo xiriiri karnaa lambarrada telefoonka aad bixisay?
gacanta/kan la doorbido _____ Haa Maya

Ciwaanka iimaylka _____

Dhibaato ma ku qabtaa ku hadalka, akhrinta, ama qorista Af Ingiriiska _____ Haa Maya

Ma u baahan tahay turjubaan? Haa Maya Waa maxay luuqadda aad ku hadasho? _____

Waxaan raadinayaa adeegyo qarsoodi ama sir ah oo waxaan ahay:

18 sano jir ama ka yar; ama

Dhibbaha tacaddiga reerka iyo qoyska ka dhex dhaca waxaanna hoos imaanayaa caymiska caafimaadka ee qofka igu xadgudbay.

Ma leedahay Caymis caafimaad oo gaar loo leeyahay ama caymiska Apple Health (Medicaid)? Haa Maya

Haddii ay **Maya** tahay, waxaad qaadan kartaa go'aan aad xog-ogaal u tahay oo ah in aadan codsan caymis Apple Health oo baaxad-buuxa ah waxaadna weli xaq u leedahay barnaamijyada FPO **adiga oo calaamadeynaya sanduuqa hoose.**

Haddii aad rabto macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida aad xaq ugu yeellan karto caymiska daryeel caafimaad kale, waxaad ka codsan kartaa **wahealthplanfinder.org**

Waxaan doortey in aan codsado caymiska qorsheynta qoyska oo keliya waxaanna sameynayaa doorasho aan xog ogaal u ahay ahna in aanan codsan Apple Health (Medicaid) oo baaxad-buuxda ah.

2. Dakhlīga Shaqada / Iskaa-u-shaqeysiga

Aad adiga kasbatay

Ay kasbadeen xubnaha kale ee reerka

Magaca cidda aad hadda u shaqeyso
(Shaqada 1aad)

Lambarka Telefoonka

Magaca cidda aad hadda u shaqeyso
(Shaqada 1aad)

Lambarka Telefoonka

Iskaa-u-shaqeysata?
Dakhlīga guud ee billaha canshuuraha ka hor Haa Maya
(iyo/ama dakhlīga bilaha ee saafiga ah ee loogu talagalay iskaa-u-shaqeysiga)

Iskaa-u-shaqeysata?
Dakhlīga guud ee billaha canshuuraha ka hor Haa Maya
(iyo/ama dakhlīga bilaha ee saafiga ah ee loogu talagalay iskaa-u-shaqeysiga)

Magaca cidda aad hadda u shaqeyso
(Shaqada 2aad)

Lambarka Telefoonka

Magaca cidda aad hadda u shaqeyso
(Shaqada 2aad)

Lambarka Telefoonka

Iskaa-u-shaqeysata?
Dakhlīga guud ee billaha canshuuraha ka hor Haa Maya
(iyo/ama dakhlīga bilaha ee saafiga ah ee loogu talagalay iskaa-u-shaqeysiga)

Iskaa-u-shaqeysata?
Dakhlīga guud ee billaha canshuuraha ka hor Haa Maya
(iyo/ama dakhlīga bilaha ee saafiga ah ee loogu talagalay iskaa-u-shaqeysiga)

Haddii xubin ka tirsan reerka uu hadda leeyahay in ka badan laba loo-shaqeeyayaal, ku soo lifaaq warqad kale oo gaar ah. Haddii aad rabto macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida loo soo sheego dakhlīga, booqo wahbexchange.org/how-to-report-income.

3. Dakhlīga Kale ee Reerka

Qaddarka billaha:

Cidda dakhligan heshay:

Masruuf/taageerada xaaska

Kiro, iyo/ama dakhlīga buugaagta ama qoraallada (saafi ah)

Dammaanada Bulshada/dheefaha Hawlgabka Waddada Tareenka

Shaqo la'aan

Dakhlīga hawlgabka, oo ay ku jiraan: lacagaha ay dowladdu siiso dadka aan shaqeyn, lacagaha sannadlaha ah, iyo/ama qaybinta IRA

Faa'iidooyinka, badeecooyina, saamiyada, faa'iidooyinka raasumaalka, dibedda, amaanada/ dakhlīga kale ee maalgashiga

Dakhlīga qabiilka ee la canshuuri karo

Dakhlīga beer-falashada iyo kalluumeysiga (saafi ah)

Dakhlīga kale ee la canshuuri karo

4. Ka-jarisyada Reerka

Qaddarka billaha ah:

Kumaa bixiya tani:

Masruufka/taageerada xaaska LA BIXIYAY

Tabarruca/IRA ama tabarucca xisaabta hawlgabka ee canshuurta ka hor

Lacag-bixinnada dulsaarka amaahda ardayda

Kharashaadyada guurista ee loogu talagalay xubnaha ka tirsan ciidamada qalabka sida

Kharashaadyada baraha

Tabarrucada xisaabta kaydada ee caafimaadka

Ganaaxa lagu soo rogo in kaydada lala bixiyo waqti hore

Kharashaadyada ganacsiga qaarkood ee la sheegan karo

5. Xaaladda Xareynta Canshuurta

Maxay noqon kartaa xaaladda xareynta canshuurtaada ee sannadkan? Hal Xareeye

Guursadey Si Kala-gooni ah u Xareynaya

Guursadey Si Wadajir ah u Xareynaya

Canshuur Ku-tiirsanaha Qof ka socda Reerka

Ku-tiirsanaha Canshuurta Qof Ka Baxsan Reerka

Xareeyaha Canshuur-laawaha ah

Miyaad sharci ahaan guursatay? Haddii ay haa tahay, magaca saddexan ee xaaskaaga _____
Haa Maya magaca koowaad, dhexe, dambe

Haddii aad xareysay canshuur celin, meeqaa qofood oo canshuur ku tiirsanayaal ah ayaad sheeganaysaa? _____

Haddii ay maya tahay, meeqaa carruur ah ayaad haysataa? _____

6. Shaqo Lumin Dhowaan ah

Miyaad isaga tagtey ama lumisay shaqo 90kii maalmood ee ugu dambeeyay?

Haa Maya

Lammaanahaaga miyuu isaga tagey ama lumiyay shaqo 90kii maalmood ee ugu dambeeyay?

Haa Maya

Haddii ay haa tahay, magaca ganacsiga: _____

Haddii ay haa tahay, magaca ganacsiga: _____

Taariikhda dhammaadka shaqada: _____

Taariikhda dhammaadka shaqada: _____

7. Asalka Isirka/Qowmiyadda

Waxaan ku weyddiisaneynaa in aad si ikhtiyaari ah noogu sheegto asalka isirkaaga ama qowmiyadaada. Macluumaadkan looma adeegsan doono in lagu tixgeliyo xaq-u-yeelashadaada adeegyada.

Caddaan

Madow ama Afrikaanka Mareykan ah

Fiitnaameed/Laatiyaan/Kamboodhiyan

Isbaanish

Hindida Mareykanka ama
Alaskaan Dhallad ah

Aasiyaan Kale ama Jasiiradle Baasifik ah

Kuwo kale: _____ Magaca qabiilka: _____

8. Si Taxaddar leh u Akhri Ka Hor Inta Aadan Hoos Saxiixin

Waxaan fahamsanahay in:

- HCA ayaa i weyddiin karta in aan soo caddeeyo macluumaadka aan bixiyo. HCA ayaa igu caawin karta in aan helo caddeynta ama in aan kala xiriirro hay'adaha ama shakhsiyadka kale.
- Macluumaadkeyga waxaa dib-u-eegi kara hay'adaha kale ee gobolka ama federaalka.
- Marka aad weyddiisato ama aad hesho kaalmada caymiska caafimaadka, waxaan u xilsaarayaa gobolka Washington dhammaan xuquuqaha taageero caafimaad kasta iyo lacag-bixinnada cid saddexaad kasta ee loogu talagalay daryeelka caafimaad.
- Waxaan fahamsanahay in codsigan loogu talagalay adeegyada qorsheynta qoyska si looga hortago uurka keliya. Haddii aan u baahanahay kaalmo kale oo caafimaad, waxaan ka codsan karaa Washington Healthplanfinder (wahealthplanfinder.org). Haddii aan u baahannahay kaalmo dhaqaale ama kaarar cunto, waxaan ka codsan karaa Xafiiska Adeegyada Bulshada ee DSHS ama Xiriirrada Washington Connection (washingtonconnection.org).
- Waa in aan ka jawaabo codsiyo kasta ee loogu talagalay macluumaad dheeraad ah 15 maalmood oo kuwa shaqada ah gudahooda ama codsigeyga waa la diiddi doonaa waxaanna mas'uul ka noqon doonaa dhammaan kharashaadka khidmadaha ee baxa iyada oo loo marayo xafiiska bixiyahega qorsheynta qoyska.

9. Wakiilka Idman ee Ikhtiyaariga ah (AREP)

Magaca / Ururka

Lambarta telefoonka

Cinwaanka boostada

Lambarka Magaalada
Abaarmanka

Gobolka Sumadda Degaanka

10. Caddeyn iyo Saxiix

Waxaan akhriyey oo aan fahmay macluumaadka codsigan ku qoran. Waxaan caddeynayaa, si waafaqsan ciqaabta been-ku-dhaarashada, in macluumaadka aan codsigan ku bixiyay in uu yahay mid run ah, sax ah oo dhammeystiran inta aan ogahay.

Saxiixa Codsadaha

Taariikhda

Ku soo celi foomka la buuxiyay Maamulka Daryeelka Caafimaadka adiga oo isticmaalaya mid ka mid ah kuwan soo socda:

- Boostada: HCA MEDS, PO Box 45531, Olympia WA 98504-5531 • Fakis: **1-866-841-2267**
- Telefoonka: **1-800-562-3022** • Iimayl-ka: **apple@hca.wa.gov**